

Diseembar 2020



Macluuumadka Ka yimid hayadda Caafimadka Danish ee ku saabsan soo bandhigita tallaalka kahortaga COVID-19



Maamulka Caafimadka Danish wuxuu usoo dirayaa warqadaan dhamaan muwaadiniinta ka weyn 18 si loogu wargeliyo tallaalka ka dhanka ah COVID-19 Warqadan waxaa ku xusan hagitaano guud oo kusabsan tallaalka ka dhanka ah COVID-19 waxeyna jawaabo ka bixiyasaa qaar kamid ah suaalahaaga kusaabsan barnaamijka tallaalka iyo halka laga helaayo macluuumadka ugu danbeeyay.

COVID-19 waa cudur ku dhici kara qof kasta Cudurku wuu ku adkaan karaa dadka qaar, Tallaalkuna wuxuu kaa caawin karaa ka hortaga cudurka Tallaalku wuxuu noqon doonaa aalad cusub oo muhiim u ah dadaalkeena ku aadan xakameeynta cudurka faafa ee COVID-19.

Tallaalka ka dhanka ah COVID-19 wuxuu ahaan doona bilaash iyo mid ikhtiyaar ah.

Marka la soo koobo

- Tallaalka ka dhanka ah COVID-19 ayaa mardhaw bilaabmi doona, kuwa ugu horeeyo ee la siin doono tallaalka waxa weeyan muwaadiniinteena wayeelka ah iyo sidoo kale shaqaalaha caafimadka iyo kalkaaliyayasha caafimadka
- Markii hore, maheli doono tallaalo ku filan qof kasto, waxeyna noqon doontaa mudo inta kahor la siin tallaalka qof walbo Markey tahay waqtigii lagu tallaali lahaa, waxaa laguugu soo wargelin doona iyadoo loo maraayo Boostada casriga ah ee borger.dk iyo e-boks. dk Haddii lagaa dhaafdo inaa hesho Boostada Casriga ah, waxaad ka heli doontaa warqad maaylka gudihisa
- Gobollada ayaa kaseeyn doona xarummo tallaalka wadan koo dhan halkaasoo muwaadiniinta badan kood ay awoodi doonan in la tallaalo Qaarkood waxaa lagu tallaali doona deegankooda, tusaale ahan guryaha lagu xanaaneeyo ama goobtooda shaqada hadii ay yihiin shaqaale daryeel caafimad ama kalkaaliye caafimaad.

Yaa la tallaalayaa?

Ujeedadu waa in qof kastoo jooga Denmark kaasoo loo ogolaaday in lasiiyo tallaallo ayaa loo soo bandhigi doonaa tallaalka Ma fileyno in tallaalka loo ogolaan doono isticmaalka, tusaale ahaan, haweenka uurka leh iyo kuwa nas nuujiya ama ilmaha, waana sababta kooxahan loo siin doonin tallaalka

Marka hore ma heli doono tallaalo ku filan qof walbo Sidaa darteed waxaan marka hore mudnaanta siin doonaa tallaalka kuwa halista ugu jiro jirro daran oo ka timaada COVID-19- waxaana ka mid ah dadka waayelka ah, dadka dagan meelaha dadka waaweyn lagu xanaaneeyo iyo dadka kale oo waayelka ah oo halista ugu jiro sababo ah, tudaale ahaan, xaalado xanuun oo horay usoo maray ama cuduro Shaqaalaha caafimadka iyo daryeelka waayelka ee la leh xariir dhow kuwa ugu nugul oo na fuliya howlaha muhiimka ah ayaa sidoo kale la siin doonaa mudnaanta Weli, maadaama tallaalo badan la bixin doono inta lagu jiro 2021, kooxo aad iyo aad ubadan ayaa la siin doonaa tallaalka ka dhanka ah COVID-19.

Sidee lagu ogeysiiaa dalabyada tallaalka

Hayyada ama maamulka ayaa ogeysiin doona dadka dagan guryaha la daryeelo iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo waayelka Haddii aad khatar ba'an aad ku jirto, tusaale ahaan, haddii aa tahay qof waayel ah ama si ba'an aad u xanuunsantahay, waxaa kula soo xiriiri kara dhaqtarkaada ama isbitaalka

Dadka waayelka ah waxaa loo soo bandhigi doona tallaalka iyadoo la eegayo waqtigeey dhasheen waxaan lagu ogeysiin doonaa iyadoo loo mari doono Boostada casriga ah ee borger.dk iyo -boks.dk Haddii lagaa dhaafto inaa hesho Boostada Casriga ah, waxaad ka heli doontaa warqad maaylka gudahiisa

Marka lagu soo bandhigo tallaalka ka dhanka ah COVID-19, waxaad sidoo kale heli doontaa macluamad kusaabsan waqtiga lagu tallaali doono Haddii ay tahay in aad kaligaa balansato in lagu tallaalo, waxaad heli doontaa macluamad kusaabsan sida loo sameeyo

Meeshee ayuu tallaalku ka dhici doonaa?

Gobollada ayaa sameeyn doona xarummo tallaalka wadan koo dhan halkaasoo muwaadiniinta badan kood ay awoodi doonan in la tallaalo Qaarkood waxaa lagu tallaali doonaa deegaanadooda, tusaale ahaan dadka deggan guryaha lagu xanaaneeyo Inta badan shaqaalaha caafimaadka iyo waxda daryeelka waayelka ayaa lagu tallaali doonaa goobohooda shaqo-tusaale ahaan isbitaalka, hoyga daryeelka ama mid ka mid ah xarumaha tallaalka Ruuxad ushaqeyso ayaa kusoo wargalin doona Xirfadlayaalka Caafimaadka, iwm.kuwaasoo ka shaqeyya banaanka isbitaalka waxaa loo soo bandhigi doona tallaalka gudaha xarunta tallaalka

Sidee buu tallaalku ku shaqeyaa

Tallaalada ugu horeeyo ee aan helno waxey kusaleysan yihiin waxa loogu yeedho teknooloojiyada mRNA Tallaalku wuxuu siiyaa difaaca jirka hor u dhac siduu u egyahay virus ta asagoona keeneynin wax cudur ah ,aragtidan hore waxey siineysaa habka jirka difaaca waqti ay kusameysato unugyo awood leh oo ka hortagi karo virusta dhabta ah haddii waligaa aad cudur qaaday Si kastaba ha noqotee, wali ma cada in qof walbo si buuxda loo ilaalin doono, walina nalama siin wax cadeeyn ah inta illaalinta ay sii jiri doonto, lakiin waxaan heli doonaa akhbaarad dheeri ah oo joogto ah. Fadlan ogsoonaw inaan isticmaali doono tallaalada la ogol yahay, Inuusan jirin wax tallaalka ah oo loo ogol yahay adeegsiga ka hor inta aan waxtarka iyo nabad gelyada sifcan loo diwangelin iyadoo la adeegsanayo daraasado iyo tijaabooyin cilmiyeeysan oo ballaaran iyo in waxtaradu si aad ah u sii weynaan doonan waxyeelooyin kastoo xun

Musada fog, Tallaalo badan oo ka dhan COVID-19 ayaa la ogolaan doonaa Sidaa awgeed weykala duwanaa karaan tallaalada shaqsiyaadka lasiin karo Faahfaahin dheerad ah waxaa ka aqrisan kartaa bogga Hayyada Caafimaadka ee Danish www.sst.dk/covid-vaccination-eng

Faahfaahin dheerad ah

waxaad ka aqrisan kartaa marwalbana aad kala socon kartaa macluamadkii ugu danbeeyay ee kusabsan tallaalka ka dhanka ah COVID-19 boggeen ah: www.sst.dk/covid-vaccination-eng

Sii wad inaa raacdo hagitaanada Hayyada Caafimaadka ee Danish

Inkastoo oo aan dhawaan awoodi doono tallaalka ka dhan ah COVID-19, waxey noqon doontaa inyar ka hor inta dad ku filan lawada tallaalin Sidaa darteed, waxaa muhiim ah inaa sii wadno raacitaanka tilmaamaha guud ee kusabsan sida looga taxadaro infekshonka bulshada dhexdeeda inta lagu jiro bilaha soo socdaan

					
Dhaq gacmahaaga ama isticmaal Jeermis dilaha gacmaha	Ilaali masaafadda	Guriga joog haddii aad xanuunsan tahay	Dareen xoogan sii fayo dhowrka	Ku qufac oo ku hindhis gacmaha shaatigaaga	Xadey taabashada jirka

Salaan



Søren Brostrøm

Agaasimaha Guud, Maamulka Caafimaadka Danish